

Maamulaha: Ku soo dhowaada Dugsiyada Dadweynaha ee Agagaarka Lakeville.

Sida aan sii wadno dadaaladeena aannu si aan u siino ardayda, shaqaalaha, iyo bulshada bay'add leh soo dhawayn, nabad iyo xasilooni, waxaan ku darnay dugsiyadeenna qaabab cusub xagga amniga. Waxaan keenaynaa Nidaam Maamulka Soo-booqadayaadha oo siin doona ardayda iyo shaqaalaha heer sare xagga nabadgalyada iyo amniga iyada la kontrolayo soo booqda kasta. Marka uu soo booqado soo galo dugsiyadeena mid ka mid ah, waxay tagi doonaan Xarunta Soo Dhawaynta ee horey ku taal waxayna raaci doonaan afar tallaabo oo fudud.

Marka hore, riix badhanka cas.

Maareeyaha Xafiiska: Ku soo dhowaada Dugsiyada Dadweynaha Agagaarka Lakeville. Sidee baan kaa caawin kara?

Waalidka Iska wax qabsatada ah: Hi. Tani waa Emily. Waxaan halkaan u joogaa inaan caawiyo anoo ah iska wax u qabsate fasalka Murow Smith.

Maareeyaha Xafiiska: Heer sare. Fadlan mari kaarka aqoonsiga Gobolka kaar aqriyaha.

Maamulaha: Haddii aanad haysan kaarka aqoonsiga Gobolka, Maareeyaha Xafiiska aa kaala caawini doona wixii tallaabooyin dheeraad xagga soo galidda.

Maareeyaha Xafiiska: Aniguna waxaan kuu daabici doonaa kaar lagugu aqoonsado.

Maamulaha: Qaado kaarkaas la daabacay oo ku dhajiso si muuqata dharkaaga korkiis. Kadibna waxaad aadi doontaa meesha laguugu talagalay.

Ayadoo lagu mahad naqayo Nidaam Maamulka Soo-booqadayaadha, ardayda, qoysaska, shaqaalaha, iyo xubnaha bulshada waxay soo booqan karaan dugsiyadeena waxayna ka caawini doontaa hubinta dhamaan la helo bay'ad nabad iyo xasilooni leh.

Xusuusnow, tallaabada ugu dambaysa waa in aad marisid kaarka aqoonsiga Gobolka kaar aqriyaha marka aad ka tagaysid dugsiyada si loo hubiyo in aad sarta ka tagtay.

Halkan dib aan u eegno afartii tallaabadood. Marka hore, riix badhanka cas. Kadibna, mari kaarka aqoonsiga Gobolka kaar aqriyaha. Arrinka saddexaad, qaado kaarka lagu daabacay oo ku dhajiso si muuqata inta booqashada. Ugu dambayntiina, mari kaarka aqoonsiga kaar aqriyaha marka aad ka tagaysid dugsiyada si loo hubiyo in aad sarta ka tagtay. Waxaan run ahaantii qiimeeynaa waalidiinta, mutadawiciinta iyo xubnaha bulshada, kuwaas oo waqti galiyay dhismayaasheena si ay u caawiyaan in ay tani u noqoto ardaydeena meel fiican.

Waad ku mahadsan tihiiin waqtiga iyo taageeridda sidii aan u shaqeeyaan lahayn si loo xaqiijiyo bay'ad leh soo dhawayn, ammaan iyo nabad.

Daawo isbeddelkeena.